



MAANSADA MASIIXA

Anthology of Somali
Christian Poetry



Aweis A. Ali
Series Editor

ISBN: 978-9934-701-86-9



9 789934 701869

MAANSADA MASIIXA

Anthology of
Somali Christian Poetry

Volume 2

Aweis A. Ali
Series Editor



Maandeeq Publishing


Published by
Maandeeq Publishing
Nairobi, Kenya

First Edition, 2020



This license lets you distribute, remix, tweak, and build upon this work,
even commercially, as long as you credit Aweis A. Ali for the original work.

This book has been published under the auspices of Somali Bible Society
SomaliBibleSociety.org
info@SomaliBibleSociety.org



Aayadaha Kitaabka Quduuska ah waxaa laga soo qaatay
Kitaabka Quduuska Ah © Society for International Ministries, 2008

Image by OpenClipart-Vectors from Pixabay

ISBN: 978-9914-701-86-9

The series editor can be reached at:
amazingwisdom@gmail.com



TUSMADA BUUGGA

DEDICATION.....	vii
HORDHAC	1
QIRASHADA IIMAANKA.....	2
U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA.....	2
BARYADA RABBIGA.....	3
SABUURKII NEBI DAA'UUD.....	3
TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE.....	4
KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA	5
JACAYL HORAY AAN LOO ARAG	8
ALLAHA AY TIISA TAHAY	9
XERTA EEBBE DOORTAY	10
IFTIINKII BAXAAYOOW	11
BOQORKII DUNIDA	16
BADBAADSHAA INNOO YIMID	17
CIISE WAA BARAKAALOO	18
TALADU WAA TII ILAAH	21
JAHADU WAA TOOSAN TAHAY.....	23
ADIGAA I JIITEE	24
JACAYLKA MASIIXA	25
XERTA CIISE SOO NOQO	28
CIISE XAAKIM WEEYAAN	29
IDINKOO DIYAAR AH	32
WAA DEEQ MAHAD AAN KA CELIN	33
NIMCAA NOO DAROORTOO	34
DARIIQIISA SOO RAAC	35
NA DARYEEL RABBOOW	36
WAQAY WAA DEEQSI	37
DARDAARAN	46
KU RAACAY MASIIXA ROOR.....	54

SAYIDOW MASIIXOW	57
SAMAALOOW SAYID MASIIX	58
SHAALOOM DADKAYGOW	61
CIISE NAGU SHUBAAYAA	62
DHAMMAAN SOOMAALIYEEY	65
ILAAH DHABA AYAAD TAHAY	66
CASIISOOW ILAAHII	68
NA CAAWI CIISOW	69
GUUSHUNA WAA TII ILAAH	72
SOO GAADH MASIIX	73
GURMADKAAGII	74
FAAFIYA INJIL	83
QUDDUUSNIMO	85
QAWLKAAGAAN RAACNAA	86
QALBIGIINA FURA	87
AWOOD KORODHA II YEEL	90
KARAAAMIYO WANAAG	91
LIIBAANAAD HELI KARTAN	94
MASIIXEENNA WANAAGSAN	97
MUGDIGII DHAMMAA	98
MAAMUUS	99
ADAA NAGA MASUULA	103
NABADDU WAA TII MASIIX	106
WEHESHADA MASIIX	108
RABBAASE II HIILLIYOO	111
MASIIXA WARKIISA YEEL	113
GUNAAANAD	114
ABOUT THE SERIES EDITOR	116



WHAT OTHERS SAID ABOUT THIS BOOK

This is another remarkable collection of Somali Christian poetry. Both the poets and the series editor have done an impressive job. Somali Christians can again speak to one another in psalms, hymns, songs, and poems from the Lord. Glory be to God.

Rev. Mahad H. Birik
General Secretary
Somali Bible Society

Maansada Masiixa, Volume 2, is yet another collection of Somali Christian poetry composed by gifted Somali Christians. This divine poetry is filled with praise, thanksgiving, reverence, exaltation, and worshipful praise of the Triune God. Maansada Masiixa can lift the mood of any Somali believer who reads it or hears it sung or chanted. This poetry communicates a thorough theological instruction to Somali Christians and seekers meeting their need for basic Christian education. Finally, as a Somali Christian, I must say how much I am thankful for the dedicated way brother Aweis is tirelessly working to educate, enlighten and inspire his fellow Somali Christians through all that he does and writes. The sacred spiritual works that brother Aweis is producing in Somali will surely be a blessing to present-day Somali Christians and those who will live in the future.

Quule M. Egal
Somali Christian Elder

Maansada Masiixa, Volume 2, is brimming with divine poetry from God. The Somali Christian poets and hymnologists who contributed to this collection have done a remarkable job. This poetry is another lasting heritage for the Somali Church. Reading the poetry in this book has refreshed our spirits. We praise the Lord for making this poetry book possible.

Shino & Shania Gabow
Somali Christian TV

This is an inspiring collection of Somali Christian poetry. Maansada Masiixa series is the first literary work of its kind in the history of the Somali Church. Both believers and seekers who love poetry will highly enjoy this work.

Ahmed Philip
Evangelist



DEDICATION

This book is dedicated to the late Prof. Da'ud Hassan Ali (1944-2008) who paid the ultimate price for his walk with the Lord.

TUSMADA BUUGGA

1. Jacayl horay aan loo arag
Amiin A. Axmed
2. Allaha ay tiisa tahay
Y. B. Xirsi
3. Xerta Eebbe doortay
Y. B. Xirsi
4. Iftiinkii baxaayoow
Mohamed Gurhan
5. Boqorkii dunida
Y. B. Xirsi
6. Badbaadshaa innoo yimid
Y. B. Xirsi
7. Ciise waa barakaaloo
J. Caalim
8. Taladu waa tii Ilaah
Y. B. Xirsi
9. Jahadu waa toosan tahay
M. Caaqil
10. Adigaa i jiiitee
Mohamed Gurhan
11. Jacaylka Masiixa
A. Hussein
12. Xerta Ciise soo noqo
Y. B. Xirsi
13. Ciise Xaakim weeyaan
J. Caalim
14. Idinkoo diyaar ah
Amiin A. Axmed
15. Waa deeq mahad aan ka celin
Amiin A. Axmed
16. Nimcaa noo daroortoo
Y.B. Xirsi
17. Dariiqiisa soo raac
Y.B. Xirsi
18. Na daryeel Rabboow
J. Caalim
19. Waqay waa deeqsi
Mohamed Gurhan
20. Dardaaran
Mohamed Gurhan
21. Ku raacay Masiixa roor
Aweis A. Ali
22. Sayidow Masiixow
Nuredin Soomaali
23. Samaaloo Sayid Masiix
Y.B. Xirsi
24. Shaaloom dadkaygow
Nuredin Soomaali



25. Ciise nagu shubaayaa
Y. B. Xirsi

26. Dhammaan Soomaaliyeey
Y. B. Xirsi

27. Ilaah dhaba ayaad tahay
Amiin A. Axmed

28. Casiisow Ilaahii
Y. B. Xirsi

29. Na caawi Ciisow
M. Caaqil

30. Guushuna waa tii Ilaah
Y. B. Xirsi

31. Soo gaadh Masiix
Y. B. Xirsi

32. Gurmadkaagii
Mohamed Gurhan

33. Faafiya Injiil
Y. B. Xirsi

34. Qudduusnimo
Aweis A. Ali

35. Qawlkaagaan raacnaa
Dugulo Maxamed

36. Qalbigiina fura
Y. B. Xirsi

37. Awood korodha ii yeel
Amiin A. Axmed

38. Karaamiyo wanaag
Y. B. Xirsi

39. Liibaanaad heli kartaan
Aweis A. Ali

40. Masiixeenna wanaagsan
Bashiir Muuse

41. Mugdigii dhammaa
Y. B. Xirsi

42. Maamuus
Mohamed Gurhan

43. Adaa naga masuula
K. Axmed

44. Nabaddu waa tii Masiix
Y. B. Xirsi

45. Weheshada Masiix
Y. B. Xirsi

46. Rabbaase ii hiilliyoo
Amiin A. Axmed

47. Masiixa warkiisa yeel
Aweis A. Ali



HORDHAC

Buuggani waa kii labaad ee taxanaha *Maansada Masiixa*. Taxanahan ayaa sanadkiiba soo baxa laba jeer. Suugaanta diiniga ah ee buuggan ku cad waxaa curiyay Masiixiyiin Soomaaliyeed oo dal iyo dibad kala jooga. Qasiiddooyinkan Eebbe amaanka ah waxaa ay marag u yihiin bisaylka Kiniisadda Soomaaliyeed ee ku sugan dal iyo dibad.

Masiixiyiinta Soomaaliyeed waxaa ka buuxa kuwo uu Eebbe hibo weyn u siiyay curinta suugaanta. Maansoolaydaas qaar ka mid ah ayaa lagu garanayaa qasiiddooyin magac iyo miisaan leh oo ay horay u allifeen. Eebbe ayaan uga mahadnaqayaa ragga iyo dumarka curiyay maansooyinka buuggan dhex ceegaaga; waa hubaal in Kiniisadda Soomaaliyeed ay uga tageen dhaxal la taaban karo.

In Rabbiga lagu amaano qasiiddooyin cusub waa qayb muhiim ah oo ka mid ah caqiidada Masiixiyadda. Mahadnaqeenna ayaan ku cabbirnaa hab maanso sida ay yeeleen dad ay ka mid ahaayeen nebi Daa'uud oo sabuurro badan uga yimaadeen xagga Eebbe. Sidaas si u eg ayay Masiixiyiinta dhowrka ah ee ku deeqay qasiiddooyinka halkan ku jira ayaa Eebbe u birbiriya maansadan diiniga ah.

Qasiiddooyinka iyo maanso diineedka kale ee buuggan ku xusan waxay idinku caawin doonaan in aad si ka wanaagsan sidii hore aad Rabbiga u caabudi jirteen uguna dhawaan jirteen aad u caabuddaan uguna dhawaataan. Waxaan si gaar ah ugu dhiiri gelinayaa Masiixiyiinta Soomaaliyeed ee hibada u leh suugaanta ay soo diraan wixii qasiiddooyin ah oo ay curiyaan si loogu biiriyo buugaagta dambe ee soo bixi doonta haddii Eebbe idmo. Waxaad igala soo xiriiri kartaan amazingwisdom@gmail.com

Aweis A. Ali

QIRASHADA IIMAANKA

Waxaan rumaysannahay Eebbaha Aabbaha ah
Kaas oo ah Qaadirka abuuray samada iyo dhulka
Iyo Ciise Masiix oo ah Inankiisa qura iyo Sayidkeenna
Kaas oo ka dhashay Ruuxa Qudduuska ah
Waxaana dhashay Maryan oo bikra ah
Waxaa uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos
Iskutallaabta ayaa lagu qodbay, wuu geeriyooday, lana aasay
Wuxuu galay Goobtii Dadka Geeriyooday
Kuwii dhintay ayuu ka soo sarakacay maalintii seddaxaad
Wuxuu aaday samada oo uu ku negaaday isaga oo ku sugan
Gacanta midig ee Eebbaha Aabbaha Qaadirka ah
Halkaas ayuuna ka iman doonaa si uu u xukumo
Kuwa nool iyo kuwa dhintayba.
Waxaan rumaysannahay Ruuxa Qudduuska ah
Kiniisadda Ciise Masiix ee caalamiga ah
Jameecada awliyada ah, cafinta dembiga
Sarakicidda jirka iyo nolosha weligeed ah

Waxaa Turjumay Aweis A. Ali

U DUCAYNTA KUWA EEBBE U ADEEGA

Eebboow Ilaahow, kuwa aad u yeertay
In ay Eraygaaga, Soomaalida u geeyaan
Ku adeecay adigee, ammarkaaga raacay
Howshu waa mid adagoo, sahal aan ahayne
Afka waxay ka doonaan, uurka uga baahdaan
Eebboow Allaw sii, adey kuu adeegaan

Agab waxay u baahdaan, yaaney waayin Eebboow
Ka ilaali cuduroo, caafimaad adigu sii



Cidla yaanay aragoo, abidkood ay ciishoon
Ehel iyo asxaab sii, halkii ay tagaanba
Afka markay furayaan, hadal adigu oo hag
Axadkii maqlaaba, ha raaco Injiilka

Kuwa Eraygaaga, raaca oo rumeeya
Oo towbad keena, bartana Injiilka
Waa xertaadi adigee, garabkood Allow gal
Ka xijaab shar oo idil, oo ku xooji Ruuxa
Miro badan Allow sii, ku addeeca adigoo
Eraygaaga baraya, Soomaali oo idil

Waxaa curiyay Aweis A. Ali

BARYADA RABBIGA

Matayos 6:9-13

Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu quduus ha ahaado. Boqortooyadaadu ha timaado, doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo. Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan. Oo jirraabadda ha noo kaxaynin, laakiin sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin.

SABUURKII NEBI DAA'UUD

Sabuur 23:1-6

Kanu waa sabuur Daa'uud tiriyey.
Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.
Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis,
Oo wuxuu ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda.
Naftayda wuu soo celiyaa.

Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor kacaa waddooyinka xaqnimada.
In kastoo aan ku dhex socdo dooxada hooska dhimashada,
Sharna ka baqi maayo, waayo, waad ila jirtaa,
Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa ii raaxeeya.
Cadaawayaashayda hortooda waxaad igu diyaarisaa miis,
Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa, koobkayguna waa buuxdhaafaa.
Hubaal cimrigayga oo dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis,
Oo weligay guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

TOBANKA AMAR EE NEBI MUUSE

Baxniintii 20:3-17

Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.

Waa inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa samada sare jira,
ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira.

Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga
Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo
gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa
i neceb, oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda
xajiya.

Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo,
Rabbigu eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.

Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto. Lix maalmood waa
inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa, laakiinse maalinta
toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad
shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga,
ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira; waayo,
Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo
waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas
daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey maalintii sabtida ahayd oo quduus uga
dhigay. Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka
Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.



Waa inaanad qudh gooyn.

Waa inaanad sinaysan.

Waa inaanad waxba xadin.

Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga,
ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa
deriskaagu leeyahay oo dhan.

KITAABKA QUDDUUSKA AH IYO MAANSADA

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,
Dadka dhulka oo dhammow, Rabbiga u gabya.
Rabbiga u gabya, oo magiciisa ammaana,
Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.
Ammaantiisa quruumaha dhexdooda ka sheega,
Oo shuulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka
dhex sheega.*

Sabuur 96:1-3

*Rabbiga gabay cusub ugu gabya,
Waayo, isagu wuxuu sameeyey waxyaalo yaab badan,
Gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa qudduuska ahuna
waxay keeneen badbaado.
Rabbigu wuxuu dadka ogeysiyeey badbaadadiisii,
Oo xaqnimadiisiiina wuxuu bayaan ugu muujiyey
quruumaha hortooda.
Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo
aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil,
Dadka dhulka darfihiisa jooga oo dhammu way wada
arkeen badbaadinta Ilaaheenna.*

Inta dhulka joogta oo dhammay, Rabbiga farxad ugu
qayliya,
Dhawaaqa, oo farxad ku gabya, oo ammaan ku gabya.
Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo kataarad haysta,
Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.
Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga dhawaajiya
Turumbooyin iyo buunan.
Badda iyo waxa ka buuxaaba ha guuxeen,
Dunida iyo kuwa dhex deggan oo dhammuna ha
dhawaaqeen,
Webiyadu ha sacbiyeen,
Oo buuruhuna dhammaantood farxad ha kaga gabyeen
Rabbiga hortiisa,
Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka xukumo,
Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo,
Dadyowgana caddaalad.

Sabuur 98:1-9

...laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. Iskula hadla
sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa,
idinkoo gabyaya oo Rabbiga qalbigiinna ka ammaanaya.

Efesos 5:18b-19



JACAYL HORAY AAN LOO ARAG

Amiin A. Axmed

Sidaad aayatiin wacan
Iyo nolol abaadi ah
Ii siin lahayd ani
Adoon eed lahayn baad
Dembigaygiyoo idil
Oogada ku qaaddood
Oggolaatay geerida

Jacayl horay aan loo arag
Runtii ugub ah weeyee
Inaan kaaga mahadnaqo
Ku ammaano adigaa
Waajib igu ahaataye

Sidii aan addoonsiga
Inkaartii dembigi hore
Uga wada xoroobo
Adigaa naftaadii
Aawaday u bixiyoo
Irdihii badbaadada
Idilkoodba ii furay

Jacayl horay aan loo arag
Runtii ugub ah weeyee
Inaan kaaga mahadnaqo
Ku ammaano adigaa
Waajib igu ahaataye





ALLAHA AY TIISA TAHAY

Y. B. Xirsi

Allaha ay tiisa tahay
Ifiyo aakhiro mulkiga
Adaa kalidaa iskaleh

Addoon aad abuuratoon
Itaal iyo awood lahayn
In badan soo galay dunuub

Afkiyo uurkaba ka qiray
Ayaal kuu baryootamee
Aabbaw Eraygaagu quman

Allaha ay tiisa tahay
Arlada noolahaa ku sugan
Amarka Eraygaagu dhigay

Irsiqa midhahay cunaan
Ogaal ku ilaliyoo
Alloow ku amaanayaa

Allaha ay tiisa tahay
Aadmiga adigaa Rabboow
Iblayska ka reebayoo
Inay ubad kuu noqdaan
Aabboow doonis taadu tahay



XERTA EEBBE DOORTAY

Y. B. Xirsi

Todobada ayaamood
Adeegyada Ilaahay
Lix inaynu qabannaa
Arrinteenu ay tahay

Xerta Eebbe doortay
Ifiinkaa baxaayiyo
Erayada Ilaahay
Ugu deeqa ummaddoo

Adduunyadan dhammaanteed
Ilaahii abuurtaan
Addeecnoo rumaynoo
Istareex ku noollahay

Ruux awood na siiyiyo
Hadyad aan la koobayn
Allabariga tuukmada
Aqbal buu na siiyaa

Walaalaha irdhoobee
Een albaabka garanayn
Eebboow iftinkiyo
Eraygaaga gaadhsii

Adduunyadan dhammaanteed
Ilaahii abuurtaan
Addeecnoo rumaynoo
Istareex ku noollahay





IFTIINKII BAXAAYOOW

Mohamed Gurhan

Gabankii Eebbeheenee
Daa'uud loogu abtiriyoow

Israa'iil firkiisoo
Aarkii Yuhuuddoow
Ruuxii Ilaahoow
Eraygii Waqay ee
Dunidaan imaadow

Awaaloo Masiixoow
Iftiinkii baxaayoow
Nuurkii abaadoow
Ilays aan damaynoo
Cidi aasi karinoow
Abid kii jiraayoow
Alfa iyo Omeegoow
Aadanaha hortisaba
Kii ahaani jirayoow
Asalkii Waqay ee
Innaba aan doorson
Laga eegahaynoow

Waligii ma iishoow
Boqorkii ammaantee
Haybad loo ogaayee
Uumiyaha dhammaan
Ifka inta joogtiyo
Inta aadday aakhiro
Lagu soo ag qabane
Asaagiisu jirinoow
Amiirkii nabadoow
Cafis kii abaadshee
Kuwii isaga aabiyay





Dembigoodii oofshee
Aan lahayn asaayee
Aarsi aan aqoonoow

Aabbihii jacaykoow
Dembigeenna awgii
Asiiliguu lahaa iyo
Alabkii carshiga sare
Arinkeenna uga yimid
Loo ajalay gefkeenoow
Naxariis abkeedoow
Dhibta uu arkaayiyo
Cabashadiisa aadmiga
Kii ahaa ijaaboow

Sayidkii adduunkoow
Kii abuuray dunidee
Erayguu yidhaahdaba
U ahaani jirayee
Amar oo dhan yeeshoow
Unuggii nimcaadoow
Kii anfaca bixiyee
Kumanaan arsaaqee
Agagaarkuu joogiyo
Gaajo ool agtiisooow

Rabbigii arwaaxdoow
Aadan intuu dhalay
Kay ku oogsadeenee
Rajo eeganaynoow

Jinnigiyo ibliiskiyo
Shaydaanka ubadkii
Kii amarka siiyee
Ay ka anfariireen
Erayguu yidhaahdee
Ka adkaa sharleydoow



Arbihii itaalkee
Quwad loo ogaayoow
Xoog kii abaadeen
Marna laga adkaanee
Qolo aabiyaynee
Aan laga irdhoonoow

Agmadkii axkaantoow
Xigmat aabbaheedoow
Kii loo ogaayee
Aqli laga isriyoow
Abwaanoow aftahankii
Soo askumay aqoontoow
Orta kii yaqaanee
Hadalkana abuurroow
Ilaheeda garashada
Kaan lala ekaynoow

Sayidkaan addeecnoow
Kaan urursan maalee
Oori aan lahaynee
Aqal aan u hoyanee
Arrimaha adduunkiyo
Waxayaal arladan iyo
Aan asiibin damacee
Ku abaaday khayrkoow
Kali ayda meeroow

Cidla aag wareegoow
Afartan maalin sooniyo
Duco aawadeeniyo
Xumaheen ka ooyoow
Samir eheladiisoo
Kii la aabiyaayee
Aflagaado oo idil
Dusha aayar saartoow



Qurux iyo edaab iyo
Rabbigii asluubtoow
Axdigii heshiiskee
Dembigii abkoowgeen
Dhiiggiisu aasoow
Warsan kii inshaaree
Injiilka noogu baaqee
Samaha noo ahaayoow

Xayi kii ahaayee
Ka adkaaday iilkee
Loo oofshay samadee
Carshigiisii aadee
Eebbeheen la joogee
Ayaantaa qiyaamaha
Kaan eeganaynee
Abshir noo ahaayoow

Ma awaalo beenoo
Asaraar ma fiicnee
Afka lagama qaadoow
Sayidkaan addeecnee
Xertiisii ahaanee
Injiilkiisa raacnee
Eraygiisa weyn iyo
Magaciisa Eebbahay
Ku nidhaahnay aamiin
Idilkood dadkiisiyo
Intaa aamintee sugi
Ruuxiisu oonkiyo
Ha ka saaro eelaha
Ha arkeen ayaankaa





B



BOQORKII DUNIDA

Y.B. Xirsi

Samo baaxad wayn
Tiir baaciyiyo
Belo hoose jiriin

Qorax soo baxdiyo
Xiddigaha bidh bidhaa
Badhtan keeda dhigay

Boqorkii dunida
Lixda bari wakhtiga
Ku bilaayayow
Badanaa nimcadu
Baashaada taal

Buur iyo banaan
Wabiyada burqada
Boqolaal malyuun
Nafay nooc ka badan
Baal ku duushadiyo
Bogga qaar ku socon
Badh lugaynayaan

Boqorkii dhigee
Wada biiliyoow
Badanaa nimcadu
Baashaada taal

Badahaa cartama
Biyahaa qadhaadh





Kii buuxiyee
Dhirta beerayee

Boqolaal makhluuq
Naflay nooc ka badan
Badhtankeeda dhigay
Boqorkii khalqee
Wada biiliyoow
Badanaa nimcadu
Baashaada taal

BADBAADSHAA INNOO YIMID

Y. B. Xirsi

Dambigii badnaa ee
Bulshadu ay samaysiyo
Buuxsamay sharkeenii

Birmad noo yimaadiyo
Baaqnabad wax sheegiyo
Wax badbaadiyaa jirin

Boqorow Masiixbaa
Bishaarootin keenoo
Naga buuxshay ruuxoo
Barwaaqaanu joognaa

Kuwii wada bukoodee
Jinku uu bhdili jiray
Bogsiiyaa u yimidoo
Beelaheeni waa nabad



Warwarkii badnaa iyo
Iblays bela xambaarsan
Xoog lagu burburiyoo
Badbaadshaa innoo yimid

Boqorow Masiixbaa
Bishaarooyin keenoo
Naga buuxshay Ruuxoo
Barwaaqaynu joognaa

CIISE WAA BARAKAALOO

J. Caalim

Ciise waa barakaaloo
Waa bushaariyo khayroo
Bulshawaynta adduunkana
Jannaduu uga baaqoo
Ballan qaadka Masiixuna
Baaqan maayo'e waa run
Waa badbaadiyaheenoo

Ciise waa barakaaloo
Waa belaayo xijaaboo
Baraarkii dembidhaafka
Waayo loo bixinaayee
Baraarkii lagu doorshee
Lagu baajiyay weeyoo
Waa badbaadiyaheenna

Ciise waa barakaaloo
Waa burhaan iyo xoogoo





Bugto aan la aqoonin
Dadka wuu ka bogsiiyoo
Baras kii la cadaadana
Kuu ka baabi'i naayoo
Kuwii beelay indhahana
Aragguu u bayaanshoo
Waa badbaadiyaheenna

Ciise waa barakaaloo
Ballankiisu run weeyoo
Isagoo boqor wayn ah
Beriguu iman doonana
Kuwa beeniya maantana
Way u baahanayaanoo
U barooranayaanoo
Waa badbaadiyaheenna







TALADU WAA TII ILAAH

Y. B. Xirsi

Taladu waa tii Ilaah
Nimaan ku taxnayn isaga
Tubuu maray naara taga

Taariikhdiis Masiixu maray
Injiilkaa tilmaamayee
Ku taga guushiyo nimcada

Dadkoo wada taahayoo
Xanuun iyo taws xun qaba
Gargaar taakuleeya jirin

Taageeraw Sayid Masiix
Intuu dambigeeni tiray
Tasmada xaqa noogu dhigay

Iftiin noo taagan iyo
Qalbiga ruuxaa ku taxan
Hadyadu tahay tii Masiix

Taariikhduu iman lahaa
Wakhtigu wuu taaganyee
Dhammaan isa soo tuboo
Walaal toobadiisa qabo

Taageeraw Sayid Masiix
Intuu dambigeeni tiray
Tasmada xaqa noogu dhigay





J

JAHADU WAA TOOSAN TAHAY

M. Caaqil

Xer wada jaal aynu nahay
Jufiyo qolo qolo ma nihin
Dad wada jira baynu nahay
Jacaylka wadaaga oo
Jannada u socdaynu nahay

Jirro iyo ciil nama hayoo
Jidkeenuna waa wanaag
Rabbigu wuu nala jiraa
Jahadu waa toosan tahay

Jaad iyo jahli waa nacnoo
Xornimmaannu u jeelannahay
Rabbiga jaalkiisa iyo
Jir qura baan wadda nohoo
Jahadu waa toosan tahay

Jigraar been beena iyo
Jeesjees waa lagu dhumoo
Jannada waxaa lagu tagaa
Jidkii Rabbigeennu maray
Waxaan jirinnaa sammaan
Jidgooyada waa nacnaa
Jidiin qallal kama baqnoo
Rabbigu waa nala jiraa
Jiheeyena waa asaga
Jaliil jilbadhigasho iyo
Run baan kula jaal nohoo
Jahadu waa toosan tahay
Jannada waxaa lagu tagaa
Jidkii Rabbigeennu maray

ADIGAA I JIITEE

Mohamed Gurhan

Adigaa i jiitoo
Qalbigayga jiifee
Ku jantoo daraaddaa
Naftaydii jibbootee
Masiixaan jeclaadoow

Adigaa i jiitee
Masiixaan jeclaanoow

Adigaa na jiitoo
Qalbigeenna jiifee
jirrabaadda naga hay
Jirrabaadda naga hay

Jaarriga ibliiskiyo
Jinni iyo sharkiisaba
Xumaha jidkiisiyo
Jalfintiisa aadmiga
Rabbigii na jiriyoow
jirrabaadda naga hay
Jirrabaadda naga hay

Masiixaan jeclaanoo
Jannada halkeeniyo
Jagadaad na siisayba
Dhinacaa oon joogniyo
Jaalkaaga oon nahay
Sayidkaan u jeeloow
jimicaaga nagu sii
Jimicaaga nagu sii

Masiixaan jeclaanoow
Adigaa na jiitoo





Qalbigeenna jiifee
jirraabadda naga hay
Jirraabadda naga hay

JACAYLKA MASIIXA

A. Hussein

Adaa jiray jooga
abidna jiridoona
jacaylka Masiixa
maxaan la jiבודay

Anoo jiran liita
dhagaxna u sujuuda
culays i duljoogo
adaa i jeclaaday

Jacaylkaaga awgay
intaad nafta dhiibtay
jidhkaaga musbaaro
miyaan juq la siinin

Adaaba jidkii ah
janada loo maraaye
ninkii jiranoowba
Injiilka ku jeelbax

Intaan ku jalbeebtoon
qalbiga kaa jeclaaday
jamaalka adduunyo
miyaanan ka jeedsan





Markay jugtu yeedheen
qiyaamaha joogno
ibliiska dhankiisa
Raboow hana joojin

Jiriiqsiga gawska
ilkaha isku jiidka
cadaabta dhexdeeda
Rabboow hana jiiifin

Ibliisbaa na jiitoo
intaa najafaayee
Masiixaa qalbigayga
Xaggiisa u jeedshay

Ninkii ku jikaara
Injiilkana diida
walaalka la jooga
ninkaana jeclaanin

Ilaah waa jacayle
siduu ula joogi
Ninkaa jinku qaatay?

Jeclow cadawgaaga
jaarkaaga wanaaji
intaad ifka joogto
wanaag haka jeedsan

Jeclaada jeclaada
Masiixa jeclaada
siduu noo jeclaaday
isaga u jeclaadoo
Jabbaar u sujuuda



XERTA CIISE SOO NOQO

Y. B. Xirsi

Xayiyow Ilaahow
Xeerkaaga wacan iyo
Xaqnimaa na deeqdee
Xagga Ciise laga helay

Xigtadiyo shisheeyaha
Xalay dhaliyo waayeel
Inay guul xambaartaan
Xaakimkaan baryaynaa

Kuwaan helin xaqnimadee
Shaydaanku wadaa xidhay
Masiixaa xorayn kara
Hadday kuba xirmaane

Shar ku waa xumaanoo
Naar kugu xereeyee
Kashaqee xaqnimadoo
Xerta Ciise soo noqo

Xasad iyo dhibaatiyo
Iska xooraa beentoo
Xiisahaa kalgacalkiyo
Walaalkaa xurmada sii

Nabad baa xaraga loo
Culamadu xadraysaa
Xariir lagu gamaayoo
Dadku xoorka maalaan





Afxumadaa xajiinta leh
Dadka bada xanuunada
Intaad wadaa xidhaan taas
Xadhko adag ku jiidnaan
Walaalkaa xurmada sii

Sharaku waa xumaanoo
Naar kugu xereeyee
Ka shaqee xaqnimadoo
Xerta Ciise soo noqo

CIISE XAAKIM WEEYAAN

J. Caalim

Ciise Xaakim weeyaan
Xog ogaal intuu yahay
Xukunkiisu weynyoo
Lama xeeladeeyee
Xag kastoo la eegaba
Xeeldheere weeyaan

Xilliguu yimaadana
Kii galay xabaal iyo
Kuwii xayi ah ee nool
Wuu xisaabin doonaa

Xinka kuwa la hoydee
Xaqiruu dab naariyo
Ku xerayn cadaabtoo
Kuwa xaqa rumeeyana
Janno xora ku hoynoo
Xumo iyo dhib moogaan





Xilliguu yimaadana
Kii galay xabaal iyo
Kuwii xayii ah ee nool
Wuu xisaabin doonaa

Xigto iyo dad xoogliyo
Kuwa haysta xoolaha
Xisaab uma eexdoo
Xagal daaci maayee
Xeeldheere weeyoo
Xaquu muujin doonaa

Ciise Xaakim weeyaan
Xaqa soori doonoo
Xumaantiyo wanaagana
Waa kan kala xadeeyee
Xeerka u sameeyoo
Xaraf seegi maayoo

Xilliguu yimaadana
Kii galay xabaal iyo
Kuwii xayii ah ee nool
Wuu xisaabin doonaa



D



IDINKOO DIYAAR AH

Amiin A. Axmed

Dabkuu shiday iblaysku
Inuu damay ha moodina
Maantaba dijaal baa
Dunidani dhex joogee
Waa iga digniinee
Inta aanu idiin dagin
Dabar adag iskaga xira

Doodi waxay ka taagnayn
Inuu Rabbigu soo degi
Idinkoo diyaar u ah
Daahirnimo ku sii suga

Ogow duufiyihi baas
Kamuu daalin xumahoo
Weli wuxuu daydayayaa
Ruuxuu dabinka geliyee
Dad yahaw feejignaadoo
Intaad ducada badisaan
Horjoogsada dulleeyaha

Doodi waxay ka taagnayn
Inuu Rabbigu soo degi
Idinkoo diyaar u ah
Daahirnimo ku sii suga





WAA DEEQ MAHAD AAN KA CELIN

Amiin A. Axmed

Haddaanad i dooran lahayn
Adigu i daryeeli lahayn
Xaqana igu duwi lahayn
Marnaba dembigiyo xumaha
Anigu daahir kama noqdeen
Runtana maan dareemi lahayn

Adaa dulligaan ku jiray
Maankaygana duufsan jiray
Daa'imow iga soo furtaye
Waa deeq mahad aan ka celin

Haddaanad dariiqi hore
Dab iyo naar inuu ahaa
Adigu iiga digi lahayn
Marnaba naftu dawga wacan
Dadaal umay soo gasheen
Iftiinka ma doonan lahayn

Adaa dulligaan ku jiray
Maankaygana duufsan jiray
Daa'imow iga soo furtaye
Waa deeq mahad aan ka celin



NIMCAA NOO DAROORTOO

Y.B. Xirsi

Dawgii xaqnimadiyo
Runtii naga daboolayd
Masiix baa dillaacshoo
Daahii ka wada rogay

Nimcaa noo daroortoo
Ruux daahiroo yimid
Yaa na daa daheeyoo
Dadkiisaannu wada nahay

Dambigiyo xumaantii
Dunidoo dhan wada galay
Masiix baa ka daayoo
Deeqdiisi ay tahay

Aarsigoo la daayiyo
Samirkoo la door bido
Yuu nagu dardaarmoo
Dastuurkeenni wada yahay

Jin kuwuu dardaray iyo
Cudurada dilaaga ah
Haddiyad lagu daweeeyoo
Rabbi noogu deeqoo
Waan dawayn karaynaa

Dirir iyo waxyeeliyo
Xasad ways ka daynoo
Jacaylkaa nawada degay
Deeqdiisi weeyaan





Aarsigoo la daayiyo
Samirkoo la door bido
Yuu nagu dardaarmoo
Dastuurkeenni wada yahay

DARIIQIISA SOO RAAC

Y. B. Xirsi
.....

Duni way dhammaanoo
Dadku wuu tagayaa
Xisaabaa dambaysee
Dariiqiisa soo raac

Dilka iyo wax yeeliyo
Duudsigoo ladaayaa
Darojooyin keenee
Dariiqiisa soo raac

Daa'imoow Ilaah baa
Dadka wada abuurtee
Adigoon dafirahayn
Dariiqiisa soo raac

Janno lagu dakeeyiyo
Boqortooyo daahira
Aan dadkeeda noqonee
Dariiqiisa soo raac

Qorax duhur cad joogtiyoo
Dayax nuur iftiin badan
Lama dadi karaayee
Dariiqiisa soo raac



Ciisaa na doortoo
Guusha noogu deeqee
Daris iyo xigaaloy
Dariiqiisa soo raac

NA DARYEEL RABBOOW

J. Caalim
.....

Rabbigii dadkiyo
Dunidoo dhamoow
Ka na doortayee
Derejiyo xil weyn
Noogu deeqayoow
Nama daayacoow
Wixii noo danaad
Noo door biddaa

Adaa deeqsiyee
Na daryeel Rabboow
Na daryeel raboow
Na daryeel Rabboow

Rabbigii dadkiyo
Dunidoo dhamoow
Samadaa dushee
Dayax iyo cadceed
Midba door xukumo
Ka dallaallimee
Roob noo da'shoow





Adaa deeqsiyee
Na daryeel Rabboow
Na daryeel Rabboow
Na daryeel Rabboow

Wabbi daahiroo
Dembi dhaaf lahoow
Naaxariis da'diyo
Ka dulqaadka loow
Ka jacayl dartii
Wiilka soo diree
Ciise noo dilee
Nagu daahirshoow

Adaa deeqsiyee
Na daryeel Rabboow
Na daryeel Rabboow
Na daryeel Rabboow

WAQAY WAA DEEQSI

Mohamed Gurhan

Danbigii Xaawiyo Aadan baa
Dadkii iyo Eebbe kala diloo
Shaydaan baa duufsaday naflihi

Waqay waa deeqsi jecel
Inuu daajiyo nimcadiisa darar
Intii dooyadiisa noqota iyo
Intaan daba galin ibliis

Waa duul sharka dooniyoo
Ku bixi duf iyo belaayo oo



Dariiqii Eebbe diide oo
Sanam iyo dhax doorte oo
Wixii dadka bi'inayiyo
Xumaan loo wada dareer

Docdiisaa la magan sadaaye
Cadhaa daartoo Eebbe dhirif
Koluu dunida maansheeyo iyo
Dabkii Sodom iyo Gomora iyo

Ciqaab aan soo daahinoo
Degdeg wax gumaadi soo
Kuwii daba maray Waqood
Abaal uma helin dabeed

Dacdarro iyo silica daran
Ma doono Eebbe diif
Naxariisaan loo aabba dayin
Iyo isagaa leh deeqi badan

Ibraahiim kuu doortay buu
Firkiisii ka door bidoo
Heshiis buu inaga dalboo
Faracii Daa'uud dhaliyo
Cadraddii Yuusuf u doonanayd
Ruuxiisaa ku soo degoo
Jibriil baa u diiqay eray
Bishaaradii Eebbe daaranaa
Diric ay umuli doonto oo
Uur bay dig tidhi dabeed
Yuusufna waa loo digoo
Inuu daryeelaa la faray

Degmo san Beytlaxam
Habeenku goortuu dumaye
Dunidu wada seexataa
Duggaal iyo daar ma haysanine





Mooro dad kale leeyihiin
Maryama ay docatay fool
Masiixuna ku dhashay darteen

Samadii baa noo dillaacday oo
Xumihii waa la duugay oo
Dambigii waa dhamaaday oo
Sharkii baa dabar go'oo
Badbaadaa noo soo degtoo
Eebbaa docdeenna yimid
Oo heshiis aan dumaynin baa
Qalinka lagu wada duugtayo
Dambigii jacayl baa baddalay
Mashxarad aan abid damayn
Farxad hees durbaanka tuma

Maqaawiir cirka daawadaa
Xiddigaha intay daalaceen
Dubad inuu yahay garteen
Waxay dadka sii toydaan
Dagalkuu joogay tageen
Dar bay caabudeen Rabbiga
Deeq malmal iyo fooxa iyo
Shay dahabay u wadeen
Markay dib u laabmayeen
Digniin soo maysan helin
Dariiq kale inay maraan

Herodos kii soo diraye
Boqorkaan dooni yidhi
Cadho soo ma uu dibbirin
Markuu iyagii waayay door
Ciidan soow ma uusan dirin
Dalandalkii doraato iyo
Da'da ka yar laba sabaan
Dhammaan waa in la dilo
Xaajadii kuma ay dambayn





Dulkaa iyo Masaari taga
U qaxa dagal nabada iyo
Meelaan sii diyaarshayoo
Duulaanka aad kaga baxdaan
Waqay soo umuu digino
Halkaa dool umaysan tegin
Oo kuma doogsan dhaax
Illaa mawdku dilay Herodos
Dalkii Israa'iilna nabad
Ubadka lagu daadahsaday
Malag soo dejiyay farriin
Reerkoo la dabaalo iyo
Inay Naasared degaan

Yaraan wuxuu daalaa dhacaba
Durba wuu tabar galoo
Cimmaanuu'eel tii Eebbe doon
Dalkii uu joogi jiriyo
Dushii Naasared ka durug
Dulkaa iyo Galili aad
Webi Urdun dooxadiisii gaadh
Durdurkii mukhuur daf yidhi
Dadkii halkaa joogay iyo
Eraygu daaftoo dhan gaadh
Wax duulku la yaabo iyo
Murti laga wada durduur
Laysku wada daaray oo
Hadalkii meel dheer dawaaf
Nafluhu jacaylkiisii darar
Dul aan dhawayn iyo gucluhu
Illaa Dimishaq ka yimid

Kuwaan waxba daalacane
Indhaha nuurkii ka damay
Durba waa loo furoo
Farxad bay daawani carriga



Kuwii aan dalan doolinee
Laxaalkii dar u beelay iyo
Curyaankii dawarsani jiriyo
Dhulkay dalan baabiyaan
Oo durdurada bootin dhistaan

Kuwii jinnigu dardaray
Ee waalida diblaha u xidhnaa
Masiixaa dabiib u noqdo
Bushigii laga dulqaadyayoo
Rabbay daacad u caabudaan

Kuwii qabriga la dul dhigee
Dadkoodii uu ka quustayee
U dawaafay aakhiro xaggeed
Geeridii waa laga daafacoo
Ruuxoodii la soo dabbaalyayoo
Xayi baa durba laga dhigoo
Eebbay dar u caabudaan

Daab iyo cudur kuwuu
Jidhkoodu uu silic danqaday
Sayidkaa ka daaweeyay oo
Fayo iyaga oo daahiray
Daanshaha farxad dakaynayaan

Kuwii daban jiray mallaay
Shabagga kolkay daadiyeen
Dalaq wax u yidhaahda iyo
Hadday daaleen wax li'i
Rabbigu soo uma doojinoo
Xadhkihii markii ay dareen
Dubaaqoodu wax uusan filan
Iyo dooni buuxda ma hanan

Kumaan kum kuwii soo didee
Isaga xigmad ka doonayee
U dib jiray dhaax aawadii





Kolkii daranyadii haysay iyo
Diiftiyo uu arkay gaajadii
Maxaa docdiina yaalla oo
Dadka laga dhex heli karaa
Su'aal iyagii soo ma dirin
Shan muufoo la soo dubiyo
Laba kalluun la soo dabaya
Soo looma keenin durbaba
Duco soo ma uusan ku darin
Dool wixii halkaa joogay iyo
Durduur shan kuni ma dharag
Dibiradaa wixii ka hadhay
Toban iyo laba dambiil
Xertii dib soo uma gurin

Duufaan xumi goortay kacdee
Doontii khatar ay gashee
Xawaaridii baqo wada dideen
Gargaar kiisa ay dalbeen
Dabayshii soo dhacaysay iyo
Baddii soo ma uu dajino
Amarkiisa kuma uusan damin

Wax aan dareenkeennu garan
Fajac aan dulkaan oolli jirin
Masiixii noo soo degee
Noo daabaana qaaday baa
Dartii samuhu noogu duxay
Xigmad aan deelqaaf lahayn
Hadal aan durqumo ku jirin
Murti duxiyo nuxurba loo
Qarniyo aan laga daalahayn
Iyo waxaan dhaxallay dahab

Kuma durduursiin karee
Wax yar baan kuu dul mari
Eebbe deeqduu na siiyay iyo



In yar oo dulucdii ah baan
Ujeedada ka dambaysa iyo
Nuxurkeeda u daadagiye

Rabbaa duco la magansadaa
Masiix wixii laga doono iyo
Deeqi waxaa leh isaga
Dembigoo laynaga cafiyay
Badbaado aan dabar lahayn
Nimcada aan durduuraniyo
Daa'imkaa samo laga helaa

Kuwaa xaqa door bidee
Ruuxiisu duggaalka u yahay
Khayr baa ku soo degoo
Dacdaroo waa laga dhawrayoo
Sharkana ka durkaa la yidhi

Jacaylka Eebbe dugul
Deriska caashaq ku dara
Beentu waa shay darane
Dibnaha ka ilaasha dulun
Runta daanyi u noqdoo
Doonaa la yidhi kalgacal

Iimaan aan dahaadh lahayn
Dadabsi iyo dabbaal ahayn
Danaysi iyo daba ool muraad
Dariiqii Masiixiyo dulkii
Sayidka aan daba galloo
Nafteenna u dooro daawadii

Dumarka oon dalaano iyo
Dangalo aan la wadaajiniyo
Xaqa oo aan duudsinaa
Dalaaf iyo waa guul daree
Wax daran yaynaan daf odhan





Daleel u sahami naftoo
U diid daandaansi kibir
Dadkuna haka nabad galeen
Dibnaha qawl ka soo bixiyo
Addinkoo wax daara iyo
Dayrkood ka tallaabsatiyo
Daalaa dhaaf reero kale

Nafluhu gef ma daayo ee
Haddii lagu daaro xumo
Dhinac lagu dumiyo feedh
Dulxumo yay ku qaadinoo
Daafac yuu galin qudhee
U dhiib daankaaga kale
Darbada hawceshee walaal

Dunidu waa eef yaree
U danqada kuwa bukoo
Bushigood ka dabiibto iyo
Daawaynta jirooliha iyo
Duljoogsiga salaanta iyo
Ducadood aamiin tidhaa
Yaa deeqda naflaha caddiban

Daran iyo Eebbaa leh deeq
Dadkuna waa galinba cayn
Mar baa lagu doojiyaa
Marna lagu daba marshaa
Hadday kuu da'do daruur
Laguu dumo maal dabeed
Bakhayl dayriya ha noqon

Dibjirkood quudisiyo
Dagaaga ood arrad tirtiyo
Agoonta ood u diir naxdiyo
Daryeelka waayeel dayacan



Ayuu Daa'imkaa ku faray
Adna lagugu doojin jeer

Waa duul insigu qaaliyee
Waligaa ha dayicin naflaha
Kuwa lagu duugay jeel
Loo diiday xoriyaddii
Dan iyo aan lahayn muraad
Wixii loo dawaro kolkaa
Iyo salaantuba waw danee
Ha dayn booqashada dabeed
Doorkaaga ha gabin bulshada

Ardaalkaan qab la doobyinee
Dallicin isla weyni doqon
Dagalka uu ku noolyihiyo
Beesha ay danwadaag yihiin
Dabac iyo adeeggeeda duman
Daabad lagu reeyo iyo
Walaal door roone jira
Dirac loo baxsado iyo
Ikhwaan dalandalka jecel
Reeruhu ay ku diirsadaan
Masiixu kaasuu dooray oo
Darajo iyo jannadiiba degi

Rabbiyow adigaale dahar
Adaan duug noqonin waa
Daal adigaan xiiq lahayn
Adaan waligaa doorsoominoo
Waxaad dorraad samaysay iyo
Naxariistaadu ay durduri
Adaa daanyi noo noqdoo
Dhiiggii aad noo daadisaa
Dembigii naga maydhayoo
Baraar kaan dubi jirriyo





Waaq dhaacin waad doorisoo
Samihii soo dabbaashayoo
Daliil waxaa noogu filan
Ruuxaaga aad soo dirtiyo
Nimcada aan durduuraniyo
Xaqii oo daahir noqdiyo
Rajada aan ku daaqsaniyo
Kalgacal diiranoo ka yimid
Docdaa aad naga jirtiyo
Dushaada iyo samirka badan

Dannigu waa male ducfiye
Waxaan darab kugu sugnaa
Inaad soo degato oo
Intaad adigu dooratiyo
Dadkaaga aad qaaddo oo
Halkaad noo diyaarisiyo
Jannadii aan dakayno abid
Ducadaa waa la aqbalee
Ku dara aamiin dabeed
Rabbiga damaashaad ku suga

DARDAARAN

Mohamed Gurhan

Dambays hawshuu u yimid
Gabbalku goortuu dumaye
Cashadii dardaarankiyo
Ahayd daba yaaqadii
Markii la diyaariyaye
Xertii miiska ay degeen
Gacmaha xeedhadii dareen
Kibis kolkaa diiranayd



Khamiirna laguba darin
Dacalka ma uusan qaban
Dabadeed ma uusan jabin
“waa jidhkaygii oo dartiin
Loo dilay weeyee darbada”
Ma daba dhigin erayadaas
Iyana daanka maysan galin

Koobkiina soo ma dallicin
Oo ducu goortuu ku daray
“waa aniga damkaygiyoo
Loo daadshay aawadiin
Dibnaha saaroo kabada
Dariiq kaygaana mara
Dawo ha idiin noqdiyo
Xusuus aad dugaashataan
Dartayna sidaas u fala”

Halkii damaashaadka iyo
Ciidda Dulmariddu ahayd
Daaskaa kolkii laga fulaye
Dushii Getsemane la degay
Cidlada soo ma dooranoo
Dacal uma uusan bixin
Ducu iyo daakir soow
Dhiiggiisii ma da’ayninoo
Hurdadii ma uu diidinoo
Intuu doorsoomay dhaax
Daduu Eebbe soo diroo
Daruuraha ka soo degiyo
Muuse lama doodahayn

Xertiisoo dagan ahayd
Gama’ soo ugama digin
Wakhtigu kuma daba maree





Qorshuu Eebbe sii degoo
Miduu Sayidku doortayoo
Ducfiyo dabadhilif noqdo
Horraanba uu ka sii digoo
Dirham iyo naar dalboo
Waxay doonayeen Yuhuud
Ku daaleen inay dagaan
Dariiqay rabeen sahloo
Dabin iyo shirqool degoo
Ciidankii Roomana dalbaday
Daankoo uu ka dhunkadiyo
Dabuub gacangalin ka dhigay

Askartii soo may dafinoo
Ma dulgayn Sanhedrin
Diginin siduu ku bixiyayiyo
Butros kuu doorka biday
Intii uusan diiqu ciyin
Saddex goor muu dafirin
Yuudas soo isma daldalin
Dugaaguna soo ma cunin
Daartuu Bilaatos fadhiyay

Duqaas lama horgayninoo
Maxaa dulmiyoo uu falay
Oo ninkan lagu dacweynayaa
Iyagii dib ma su'aalino
Sidii uu dembiile yahay
Ama uu dakaneba qabo
Noo daa Baraabbaska xidhan
Oo dila Ciise ma odhan
Saliibka in lagu daldalo
Ma noqon taladii dabeed
Daal iyo daaqa iyo



Dubayn wixii gaadhay iyo
Itaalkii soo ma uu darayn
Mid dooloo Simoon la yidhi
Dadkii halkaa joogayoo
Inuu daawado u yimid
Qorigii soo laguma dirqiyin
Dushana looma saarin dogob
Duleedkii magaalada iyo
Dulkii loo yiqiin Golgota
Inuu durba geeyo oo
Intaan maalintu dumine
Sabtidu soo daf odhan
Degdeg loo dabo Rabbiga
Docaha soo kamaysan xigin
Laba dembi soo faloo
Ma noqon sidii daalinkoo
Digasho aanuu mudnayn
Diriiskuu xidhnaan jiraa
Dur iyo loo daabacantamoo
Boqorka daawadaa la yidhi
Dubkaa waran laga gashoo
Dushaa loo saaray qodax
Qoraxdii nuurkaa ka damay
Gudcur baa duhurna yimid
Gondaha soo lagama durin
Geedkii laguma daabin oo
Dushaa sare looma dhigin
Markay naftu daysay baa
Dunidii waxaa helay gariir
Buurihii oo dildilaaca iyo
Daahii macbudkoo badhaha
Iniba daan aadday iyo
Qabuurihii hore loo dadoo
Daboolkii ka qaadmay iyo





Duul reer aakhiraad ahoo
Dib u soo noolaaday oo
Dadkii wacdiyina la arag

Mid dariiqadii raacday ahoo
Dahsoonaa oon laba aqoon
Dadkuna uu Yuusuf yidhaa
Bilaatos soo kama dalbinoo
Maydkaan duugi ma odhan
Xariir soo kuma duubinoo
Dahar cusub muusan dhigin
Dushaa in laga ilaaliyana
Yuhuuddii ciidan ma dirin
Saddex ayaantii dabeed

Maryan diracdii reer Magdala
Dumaray horseed u tahay
Dulkii uu yaallay iyo
Rabbigii daya maysan odhan
Malag holacii dab iyo
Nuurkiisu qoraxdii ka daray
Dudadii godku uu ahaa
Dhagaxii ma dul joogsanoo
“Sayidkii idin daba maryoo
Geeridii wuu diidayee
Maxaad dadka mootan iyo
Qabriga daya u leedihiin
Ordo xertiisii u diga
Dulkaa iyo Galili taga”
Hadal diiran sooma odhan

Danni lagama waayo dade
Godkii dalaq maysan odhan
Xariirtii lagu duubay iyo
Karfantoo dhagax dul taal



Dhaayaha kuma daalacan
Durduro dib umaysan noqon
Dariiqa intay sii socdeen
Iyagoo dawakhsan oo cabsani
Haddana farxad daanshooni soo

Dawgii ay marahayeen
Si aan dubaaqoodu filan
Durba Sayidkii ma arag
Caghiisa kuma daadan oo
Ma caabudin Daa'imkood

Fariin soo ma uusan dirin
Intaad daysaan baqaha
Dalkii Xawaaridu jirtiyo
Duudkii Galili ku yaal
Risaalo ay ku diirsadaan
Degdeg u gaadhsiiya oo
Docdoodaa inaan ahiyo
Inaan soo dayi dhawaan

Degelkii sooma uu tegino
Xertii uu doortay iyo
Intii daacadiisa iyo
Ahayd doonyadiisa ruma
Umuu dejin laabta oo
Shakigii kama dulqaadiino
Siduu Eebbe doonayyo
Umuu dirin hawl dabeed

Ordoo gala dunida oo
Usheega dadkoo dhanba oo
Dacwada Eebbe qaada oo
Waxaan dorraad idin bariyo
Injiilkana ku dooda oo
Deeqsiiya warkaa san oo





Dembiga ka durkana dhahoo
Mukhuur ay ku doogsadaan
Magaca Daa'imkiina iyo
Curadka uu doortay iyo
Ruuxiisa uu soo diraad
Biyaha daf ku siiya oo

Samaha ha ka daalinoo
Ha raacina dano gaar aho
Dardaaranka ha ka leexanina
Magacayga ku diirsadoo
Danaha aad leedihiin
Dalab Eebbe ku warsadoo
Ducada iyo badiya digriga
Anna idin dayici maayo ee
Docdiinaan goorwalba aho
Ruuxaan idinku soo dejino
Idiin noqon wehel dabeed

Goortuu hadalkii daba jaraa
Iyadoo la daawanahayuu
Samada u duulay oo
Waxaa qariyay daruuro oo
Carshiguu dib ugu noqdo
Kursiguu ku dangiigsadoo
Boqor weeye Daa'imoo
Weligii aan duugoobin oo
Geeridu ma dullayn kartoo
Ibliis ma dawaafsan karoo
Dib buu u soo laabmiyoo
Dunidaan isagaa xukumi



R



KU RAACAY MASIIXA ROOR

Aweis A. Ali

Aniga oo rafaadsanoo
Rabbiga aan garanahayn
Dhagax ay meel rogojiyeen
Rukuuc la abbaartamaa
Ku reemaayoo ku jabay

Carabi Riyaad nooga yimid
Wixii igu rogaan rabaa
Ma Soomaaligaa reebbanoo
Rabbigu uu neceb yahoo
Ka reebay salaadihii?

Anoo Islaamkaba u raran
Run iyo been kala aqoon
Riyiyo qaraw badan ku jira
Risaalo rabbaani helay
Ku raacay Masiixa roor

Haddeer farxad raagta iyo
Raxmad xagga sare ka timid
Injiil run ahoo la hubo
Jannada raas ii ahoo
Rafaad iyo ciil ka baxay

Nacayb waan ka raystayoo
Jacayl baa igu rakiban
Qayr baan ku riyaaqayaa
Rays iyo waxaan helay ka roon
Rabbigaa mahaddaa iska leh





Soomaalida lagu riday
Hog aan laga soo rawixin
Runta laga dhowrayee
Xumaan intay kala rogaan
Rabbigaa ka raaliya la yiri

Shaydaan reja malahane
Rajuu idinka dhigahayaa
Rabbigaa raaxa laga helaa
Runbuu idiin jecelyehee
Isaga wada raaca hee



S



SAYIDOW MASIIXOW

Nuredin Soomaali

Samada iyo adduunkaba
Saameelka lagu sugay
Sayid Ciise inuu yahay
Waan wada ogsoonnee
Sacabada u wada tuma

Sayidoow Masiixoow
Saaxiibka noloshow
Saacaddaanu joognaba
Samaantiyo jidkaagiyo
Sugnaantaada nagu haay

Safka doortay janadee
Saxariirta dunidiyo
Siliciyo dhibaataada
Sayidow daraaddaa
Loogu gaysanaayana
Ku samraaya nagayeel

Sayidow Masiixoow
Saaxiibka noloshow
Samaantiyo jidkaagiyo
Sugnaantaada nagu hay

Saacaddaanu joogniyo
Suryadaanu maraynaba
Sarreeyoow Ilaahoow
Dariiqada saxnaantiyo
Seerahaaga nagu sug



Sayidow Masiixow
Saaxiibka noloshow
Samaantiyo jidkaagiyo
Sugnaantaada nagu hay

Sinna kuuma dafirnoo
Sayidow la'aantaa
Soor iyo sacaadiyo
Saaxad maba helaynee!

Sayidow Masiixow
Saaxiibka noloshow
Samaantiyo jidkaagiyo
Sugnaantaada nagu hay

SAMAALOW SAYID MASIIX

Y. B. Xirsi

Samaaloo Sayid Masiix
Rabbiga samadaa ka yimiid
Iftiin nasiraada iyo
Wanaag buu noo sidaa

Dunuubtaan samaynay iyo
Xumaan tuu suuliyoo
Sad iyo sooryooyin wacan
Rumaystaha siinayaa

Injiiku sidii uu yiri
Hadalka Sayidkeenu yahay





Salaan lawadaaga iyo
Jacayl ha sugnaado abid

Midhaha siidh labeera iyo
Xertoo lasameeyabaa
Walaal saamigeenu yahay

Sharkuna sun iyo seef
Suryada cadawgeenu dhigo
Intaad wada saahiddaan
Waliba soon iyo salaad
Ku suga Sayidkeena jira

Injiiku sidii u yiri
Hadalka Sayidkeenu yahay
Salaan lawadaaga iyo
Jacayl ha sugnaado abid



SH



SHAALOOM DADKAYGOW

Nuredin Soomaali

Shaaloom dadkaygoow
Shaydaan ka kaalaya
Aan ku shawrno jannadee
Kasoo laabta shoo'eel

Sharka waan ka baydhnoo
Sharaf iyo karaamiyo
Wanaag wixii la sheegaba
Masiixaa inno shubay
Shaki malahan taasiye

Shaaloom dadkaygoow
Shaydaan ka kaalaya
Aan ku shawrno jannadee
Kasoo laabta shoo'eel

Shakhsigii maqlaayoow
Shaybaadh naftaadoo
Xaqiiqada u sheegoo
Shafeecada ha seegine
Shaxshax Ciise soo raac

Shaaloom dadkaygoow
Shaydaan ka kaalaya
Aan ku shawrno jannadee
Kasoo laabta shoo'eel



CIISE NAGU SHUBAAYAA

Y. B. Xirsi

Shaydaanku waa cadaw
Dadka shuush ku ridayoo
Sharaftuu halleeyaa

Shuqulada iblayskiyo
Shaki iyo calool xumo
Shayгаа kawada taga

Sharci lagu burburiyiyo
Sheekhyaa u joogee
Shalaw dheer ka wada rida

Dagaal lagu shuf beeliyo
Dhiig shalalax leyyaa
Shaqadiisi weeyaan

Shaydaanka naaroo
Intaad wada shakaashtaan
Shook adag ku wada xidha

Sharci lagu burburiyiyo
Sheekhyaa u joogee
Shalaw dheer ka wada rida

Sharka duniidan yaaliyo
Shaashuu sidaaye
Dhuxulaha ku wada shida





Nimco lagu sharaabiyo
Dawo lagu shifoobuu
Ciise nagu shubaayee
Shaydaan ka soo taga

Sharci lagu burburiyiyo
Sheekhyaa u joogee
Shalaw dheer ka wada rida





DH



DHAMMAAN SOOMAALIYEEY

Y. B. Xirsi

Dhammaan Soomaaliyeey
Dhawaq baan kuu sidaa
Xaqnimo ay ku dheehantee
Dhegtiyo dhaayihiina fura

Arlada Rabbigii dhigee
Dhulkiyo samadaa rakibay
Dhammaan noolaha ku nool
U dhigay dhuunigay cunaan

Farriin dhiniciis ka timid
Injiil lagu soo dhigaan
Dhabtii kuu soo helee
Dhugoo dhiniciisa imow

Walaal adi kula dhashoo
Dhammaan xumihii ka tagay
Farxadda lagu dhaamiyoo
Jacayl dhuuxiisa galay

Colaad lagu dhaawacmiyo
Dhac iyo boob laysku daro
Dhulkana dhaafoo tarmaya
Dembiga dhimashaa ka rooon

Farriin dhiniciis ka timid
Injiil lagu soo dhigaan
Dhabtii kuu soo helee
Dhugoo dhiniciisa imow



ILAAH DHABA AYAAD TAHAY

Amin A. Axmed

Ilaah dhaba ayaad tahay
Dhammays tiran oo la hubo
Wax loo dhigaba aan la arag
Adaa cirka iyo dhulkiyo
Dhammaan noolaha ku jira
Abuuray dhirtiyoo badaha
Iyo buurahaba dhaadheer

Anoo xaqa dhaadin weli
Dhumay baadinimo darteed
Eebboow adigaa dhabtii
Dhalanteed iga soo furtayoo
Dhabbadii toosnayd i baray

Ilaahay aanan dhimanayn
Dharaar iyo habeen jiroo
Lahayn billow iyo dhammaad
Adaa dhuuniga la cuno
Dhaydiyo biyahaba la cabbo
Dheeftiyo risiqaba baxshoo
Koonkoo dhami u ah Ilaah

Anoo xaqa dhaadin weli
Dhumay baadinimo darteed
Eebboow adigaa dhabtii
Dhalanteed iga soo furtayoo
Dhabbadii toosnayd i baray



C

CASIISOOW ILAAHII

Y. B. Xirsi

Cirkan saree la taagiyo
Carradeenan gogosha ah
Buroo lagu camirayoo
Dhirtu ay cagaar tahay

Casiisow Ilaahii
Cayn kasataba wixii nool
Nabad lagu caweeyiyo
Calaf kooda wada qoray

Caruur Aadan wada dhalay
Inay wada colloobaan
Camal weeye shaydaan
Cidhibtiina goyn kara

Ciladaha qarsoon iyo
Calool hoose wixii jira
Cafisbaa daweeeye
Caalamkoo dhan sii daa

Dadkoo cayn ugaadhoo
Cuduradu dilaayeen
Gargaar caawiyaa jirin
Talo ay cakiran tahay

Gurmad caafimaad iyo
Mucjisooyin caanuu
Ciise noola yimidoo
Culayskii ka wada qaad





Caruur Aadan wada dhalay
Inay wadaa colloobaan
Camal weeye shaydaan
Cidhibtiina goyn kara

Ciladaha qarsoon iyo
Calool hoose wixii jira
Cafisbaa daweeeye
Caalamkoo dhan sii daa

NA CAAWI CIISOW

M. Caaqil
.....

Na caawi Ciisow na caawi
Na caawi Cisoow na caawi
Oo culaysyada naga dulqaad
Cajiib yada jira adduunka
adigaa Ciisow yaqaan
Culaysyada naga dulqaad
Adiga cudurada wax dila
Adiga Ciisow bogsiiya
Culaysyada naga dulqaad
Adiga cirifyada adduunka
Ciroole iyo caruur
Adiga caanoo la garan
Culaysyada naga dulqaad
Qofkii Ciisow ku dhaha
Adigaa soo caawiyoo
Ee culaysyada kugu rogaan
Qofkii cadho seexan waaya



Adigaa laabtiisa cula
Culaysyada naga dulqaad
Adigaa cisi iyo wanaag
Ciddii kaa doonta siiya
Culaysyada naga dulqaad
Adigaan caasiga necbayn
Adigaan cidna aan fogayn
Na caawi Ciisow na caawi
Oo culaysyada naga dulqaad



G



GUUSHUNA WAA TII ILAAH

Y. B. Xirsi

Xertii la garaaci jiray
Xumaha lala gaadayee
Injiilka dartii u go'ay

Jannada loo sii gogliyo
Guryaha raaxadu dhex taal
Masiix baa guddooma yiri

Go'aankeenu waa rumayn
Xertiisaan gaar u nahay
Guushuna waa tii Ilaah

Bulshadu way guurtayoo
Waxaa loo geeddi yahay
Ballantu goobtay ahayd

Rabbigu uu noo gingimay
Xariir lagu wada goglee
Iftiin gaarihi ka baxo

Go'aankeenu waa rumayn
Xertiisaan gaar u nahay
Guushuna waa tii Ilaah

Gubasho dambi lagu mutiyo
Xumaantaan soo galuu
Garbaha saaray uu cafiyay





Nabaddan gayigeenan taal
Midhaha aan goosannee
Guddoomoo gacmaha fidi

Go'aankeenu waa rumayn
Xertiisaan gaar u nahay
Guushuna waa tii Ilaah

SOO GAADH MASIIX

Y. B. Xirsi

Gu'yaal iyo gu'yaal
Xaq la goobayoo
Guulle noo dhashaan
Qalbigenna galay

Gayigeenan iyo
Goboladu dhammaan
Xaq inay garteen
Guulle tuugayaan

Wakhti gaaban iyo
Geeri baa jirtee
Intay daan god galin
Soo gaadh Masiix

Guulloow Ilaah
Giddigeed dunida
Guud samada taal
Dhulkan gogol ka dhigay





Garashiyo caqliga
Gooni nooga dhigay
Amaan gaara iyo
Mahad buu gayaa

Wakhti gaaban iyo
Geeribaa jirtee
Intay daan god galin
Soo gaadh Masiix

Xukun gaara iyo
Garoon baa xisaab
Lagu kala guriye
Gurigii san imoow

Naaro gubanayoo
God cadaabi taal
Ka gariira oo
Gurigiisan imoow

Wakhti gaaban iyo
Geeri baa jirtee
Intay daan god galin
Soo gaadh Masiix

GURMADKAAGII

Mohamed Gurhan

Garaadkaagu weynaa
Badanaa garashadaaduna
Jacaylaan abid gaagixin
Nimcadaada guud iyo



Raxmaddaada gaarka ah
Gargaarkaaga aan cidii
Marna goyni karin iyo
Naxariis gu' weyn iyo
Adigaa garawsho leh

Gaban markaan ahaa iyo
Hadduu xoog i gaamuray
Gallad taada Eebboow
Adigaa garabkayga iyo
Li ahaaba gaashaan

Markii ay i guuleen
Cadawgay i gaadeen
Gabbod laygu maagee
Laygu helay gabraartii
Gabayraha u rooreen
Gacal aan u ciirsado
Iyo waayay gaaraan
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Li ahaaba gaashaan

Markii guluf i weeraray
Layga maray goonyaha
Nacabkay gadoodani
Gaashaanka buureen
Gees walboon eegaba
Gaaska iyo guutadu
Waran igu gadaameen
U gurteen hubkoodii
In ay tayda gooyaan
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay





Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii ganaf colaadeed
Reerkaygoo la gabawaro
Gabagabana laga dhigo
Tashi ay ku gaadheen
Gurteen xoolo haygii
Gasiin kaan lahaa iyo
Guunyadiyo gammaankii
Guri iyo waliba gaadiid
Laga dhigay gabaahiir
Goob bannaan i joojeen
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii gaaridaan lahaa
Gabanadii aan dhalay iyo
Gabdhihiyo dhallaankii
Indhuhu ay guduuteen
Goroseen calool xumo
Galaayuusku yeedhaye
Gabawaras inuu helo
Ay gaadhay xaajadu
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garaabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii goluhu ii shiray
Loo wacayna guurtiga
Gef aanan lahayniyo
Ceebayn la guda galay



Loo guntaday xumaantay
Gees ka geesna faalladu
Wada gaadhay uunkaba
Layga dhigay gabbaankee
Doqon aan garaad iyo
Lahayn garasho dheeriyo
Gorof dawdar baasiyo
Laygu tiriyay gaanjida
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii lay gulaalee
Gocor laygu sheegee
Gaar la ii faquuqee
Layga gooyay beeshee
Sidii goroyo cawshaba
Gooni meer ahaadee
Lay go'doonshay awгаа
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii xigtadaydii gacal
Ii saartay gaaraha
Gaadhay dayradaydiyo
Gayr in lay bado
Lay guhaadshay dhaaxoo
Geeridayda loo bogo
God sidii aan galay
Nolol lay gunaanado
Intii shay gadaafo ah





Garta layga dhigayee
Aan gumoobay awgaa
Gallad taad Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Kolkii asmada lay ganay
La ila gaaday sixirkee
La igu gaafay belaayada
Sharka la ila daba galay
In la gaddiyo ruuxaygiyo
In la gaabsho dhaayaha
Falka layla goobaye
Layla gaaf wareegaye
Guntin lay xabaalaye
Geedo jaanna lay sudhay
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii reerkayga loo galay
Gacalo taan jeclaadiyo
La gubaabshay xaaskee
La galay dhexdaanada
Gurigaygu inuu dumo
La kala geeyo qoyskana
Gadhcas iyo gambooley
Midiba uu geestii
Gucle roorka badiyeen
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay



Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii ubadka loo galay
In la gambiyo firkaygiyo
In gab nalaga dhigo
Gablan la ila doonaye
Waabay la soo guray
Inta geed dhunkaaleed
Naloo galiyay raartee
Gasiinkaan cunayniyo
Intii weel guriga taal
Lagu gaaray saxamada
Inay badato geeridu
Go'aan sabiga oo dhami
Adigaa ka guda yidhi
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii ganacsigaygiyo
Hawshayda gaarka ah
Layga galiyay farahee
Lagu sheegay guracee
Xumo aanan galiniyo
Waxaan oollin goobtaba
La ii sudhay goroddee
La gurayay raadkay
Loo laabay gaafaha
Galgalinna laga dhigay
Gambana ha waayoo
Ha gaajoodo reerkuyoo
Ha guuraanna lays yidhi





Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markii deriskii goonyuhu
Noo yeelay gawlkee
Gawsahana noo dhigay
Gaadhi waayay ubadkuna
Goobtii waxbarashada
Loo istaagay gaasaha
Kuray maro gaduudani
Aflagaado iyo gacanqaad
Gaalada laaya uu yidhi
Waalidkiina garab galay
Gabrid noqotay meeshii
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Markuu gooddigii iyo
Batay gaara gaarays
Nala galiyay geeskee
Geyigaan ku noolayn
Beeshaan gacal ahayn iyo
Intii biri ma geydada
Nalaga yeelay goonida
Haddaan gaadhno meeloo
Dano gaara aadnana
Gacan fiqa baaqiyo
Gafi mayno aabiga
Mid gidaarka yuurura
Oo gabay dantiisiyo



Arebo gawso weyniyo
Jaahil soo galootiya
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan

Afka laguma gaadhoo
Goob haddaan idhaahdana
Soo goyni maayee

Markii xaajo gobo'diyo
Gasho meel cidhiidhiya
Gargaarkaygu waa adi
Gacantaada weyn baa
Goonya hayga joogtoo
Ka helaa garbaynoo
Galin maayo laabtana
In layga guul heli
Gallad taada Eebboow
Gurmadkaagii waan helay
Adigaa garabkaygiyo
Ii ahaaba gaashaan





F



FAAFIYA INJIIL

Y. B. Xirsi

Ficilada iblays
Na fogeeyayee
Fool xumooyin dhala

Fiid iyo aroor
Ka fogaada oo
Faa'idooyin dhala

Bulshooy fiirsadaay
Fakhri iyo danyari
Fasaad buu sidaa

Foojignaada oo
Xaqa fidiya oo
Injiil faafiya

Kuwa fooraree
La fidmeeyayaan
Runta loo fasixin

In lasoo furfuro
Gurmad lagu farxiyo
Baryo foom u shida

Samadoo la furay
Fooqyada jannada
Aynu fuullo oo
Wada faa'iidnee

Foojignaada oo
Xaqa fidiyiya oo
Faafiya Injiil





QUDDUUSNIMO

Aweis A. Ali

Qaaliq ayaa wuxuu na yiri
Qudduus ayaan anigu ahay
Qudduus ii noqda aniga
Qofkii aan qudduus ahayn
Ayaan Qaaliq aan arkayn

Qofkii Eebbihiisa jecel
Qumaati u raaca runa
Qurunka ayuu naca
Qayrkuu door bidaa
Qaneecana kaba helaa

Masiixa qofkii aqbala
Injiilkana qaata gebi
Qofna ma xumeeya oo
Qadaf cidna kuma falee
Qallooc ayaan lagu aqoon

Ma qaldame waa Ilaah
Intuu qalqayoo dhammina
Qof wada toosaanaanba jirin
Qorniinkanba ogolayn
Qalad loogu dhaco ciyaar

Haddii qalooc naga yimaad
Masiix qaaliyahaan qabnaa
Noo qubay dhiigiisa idil
Qasqaska isagaa cafiyi
Qalbi daahiruu rabaa



Qudduusiinta Allow
Deriska qiimeeya oo
Masaakiinta u qidmee
Kii cadaw kuu ahoo ku qiran
Jacayl qaaliya tusiya

Bakhayl qiima malahane
Qaaddir waa deeqsiye
Wixii quud aad hesho
Ama qarash aad hayso
Dadku qayb haka heleen

Aadmiga oo qaar qatoon
Quraac aan haysano
Qadana meel lagu ogayn
Cashana ay quusba tahay
Keligaa quud ha cunin

Qab weynina lama rabee
Dabecad qabow ayuu
Qaaddirkeen inna faree
Is qaad qaad waxaa ka roon
Dhulkoo lays qotomiyaa

QAWLKAAGAAN RAACNAA

Dugulo Maxamed

Qalbigaan kaa rumeeyayoo
Afkaan kaa qiranayaa
Qawlkaagan raacayaa
Waxaan qiimeyn kareyn
Dhiigaagaad ii qubtoo



Qudhaad ii bixisaybaa
Dhammaan qaamihii gudoo
Ruuxaygii qabowsayoo
Farxad baan ku qayliyaa
Magaca qaaliga ahow
Qudduus baan ku qaaliyaa
Qodobka lagu taagey iyo
Dhammaan qoonkii ku yiil
Mid kaan aan ka qoomamoon
Midkaan la qalibin dhulkee
Aadmiga uba qiil dayee
Kuwii dhiigiisa qubay
Danbigoodi qaadayow
Qalbiga kaa rumeeyayoo
Afkaan kaa qiranayaa
Qawlkaagaan raacaya

QALBIGIINA FURA

Y. B. Xirsi
.....

Sharku waa qadhaadh
Naar qiiqaysiyo
Qoolbuu ku gelin
Loo qiil helayn

Bulshaduu qasaa
Kala qaybiyaa
Qawlkii xaqnimo
Runta qaata oo
Injiil wada qabsada

Qaaddiroow Ilaah





Qorshiiisa wacan
Aynu qaabillee
Qalbigiina fura

Taariikhda qoran
Qoomkii Fircoon
Kibir qooqanaa
Xoog lagu qabtee
Badda lagu qarqiyay

Midkastoo qarnigan
Is qaad qaadayoow
Ma qarsoomayside
Isa soo badh qabo

Qaaddiroow Ilaah
Qorshiiisa wacan
Aynu qaabillee
Qalbigiina fura



K



AWOOD KORODHA II YEEL

Amiin A. Axmed

Ma kadeedmo weligay
Kibistaa la quutana
Kama daba ordaayoo
Kurbo wayga dheer tahay

Kollay inaan adeegoo
Kuwo badan Injiilkii
Kasha laabta ugu shubo
Dabeed koriyo weeyaan
Hadafkayga koowaad

Rabboow kaalmadaadaan
Mar kastaba u baahnee
Awood korodha ii yeel

Kol haddaan runtii helay
Kaahii Injiilkana
I hor kacayo weligii
Ima kediyo ina belo

Maanta koox iblaysku
Buuraha korkoodiyo
Kaymaha la tegay baan
Intaa daba kadleeyaan
Soo kaxee is leeyahay

Rabboow kaalmadaadaan
Mar kastaba u baahnee
Awood korodha ii yeel





KARAAAMIYO WANAAG

Y. B. Xirsi

Anigoo kadeed
Kurbo iyo xanuun
Kaar seexanayn

Habeen sare kacoo
Subixii kalaha
Kalmadaydu tahay

Kan i maamuloow
Kollay ii dhawide
Rabbiyoow kumee?

Kaliil iyo gu' da'ay
Aan kala jeclayn
Koore lay dul sudhay

Ruux kaamilaa
Ciise keenayoo
Waan keefayaa

Kulligeed dunida
Kii taagayee
Koonkaba lahaa

Koreeyoow Masiix
Xaqa keenay baan
Kadinkiisa galay



Karaamiyo wanaag
Kayd noogu shuban
Ka helaa Injiil

Kulligeed xamdida
Kii naga mudnaa
Na kaalmeeyayoo
Ku xamdiyaynaa

Ruux kaamilaa
Ciise keenayoo
Waan keefayaa





L



LIIBAANAAD HELI KARTAN

Aweis A. Ali

Soomaalida lurka iyo
Lugooyada inta la baday
Lalabka inta loo akhriyay
Carabi diin looga dhigay
Luufuufkiyo daalku helay

Lakabka ay kugu rideen
Injiil lagu ciil baxoo
Haddaad laacdood caabtaan
Lurkaad uga bixi dhammaan
Lis xoolaad kaaga roon

Shaydaan luuqiis war diid
Ka leexoo ha u dhawaan
Haddii orod loogu tago
Adoo luudayaad ka iman
Laayacaad soo arkaye

Nin liitoo hoog ku dhacay
Iblays laafyo ugu tagee
Luquntuu dhiibtay kaas
Kaa leexi Eebbana shartaas
Laxawga heerkaas la'eg

Haddaad Laaso joogtaan iyo
Luuq iyo gobollo kale
Lumitaan qiil malahan





Liibaanaad heli kartaan
Haddaad xaqa laayacayn

Xaqaan laba dhigay
Laydha yuu kaa raacino
Laakiinta ka ilaali oo
Geliya laabtiinna oo
Idinkaa wada ladnaan







MASIIXEENNA WANAAGSAN

Bashiir Muuse

Mahadow i dhageyso
Maryaney i dhagayso
Masiixeenna wanaagsan
Mawlihii inna uumay
Midigiisa fadhiistay
Markhaatigiisa la yaabo
Mawjadaha laliskiyo
Miidhiyada ka fidiyoo
Meel walbaaba ka sheegoo
Midig bidix u tuuroo
Maxabadiisa Masiixa
Meeqaankeeda la yaabo
Ha ka maagine faafi
Maskaxdaada ku hayoo
Maxfallada adduunyada
Marwooyin iyo mudanaba
Maqashiiya uunkoo
Si kastaba u muujoo
Marna yayna kaa tagin
Inaad marag furtaanoo
Mixnad iyo dhibaatiyo
Murugaba u jiidhaan
Maxbuus aad u noqotaan
Magac weyn u yeeshaan
Maamuus uu gaariyo
Mudnaanteeda siisaan
Murana uusan kaa galin
Malamala warkeed daa



MUGDIGII DHAMMAA

Y. B. Xirsi

Maryan maalintuu
Macbuud doortayee
Masiix hoo la yiri

Mugdigi dhammaa
Maalin baan helnoo
Xaqa miisannaa

Haddiyad ruux Masiix
Yaa na maydhay oo
Ku midaysannahay

Mulkiiloo Masiix
Masalooyin badan
Murti nooga dhigay

Madigii Ilaah
Mucjisooyin badan
Muddo soo bandhigay
Nooleeyay mayd
Haka maanicine
Mahaddiisa qira

Waan mahaddinnoo
Murug iyo xanuun
Waan ka maydhanay

Midho soo bixiyo
Xer la maydhay buu
Maanta doonayaa





Marin uun la hubo
Maqaamkii jannada
Loo mari lahaa
Jidku waa Masiix

Muxubada kalgacal
Mawjadaha Rabbiga
Yaan muquurannoo
Dhax mushaaxaynaa

Madigii Ilaah
Mucjisooyin badan
Muddo soo bandhigay
Nooleeyay mayd
Haka maanicine
Mahaddiisa qira

MAAMUUS

Mohamed Gurhan

Mutux iyo maatux iyo
Mindiyo laysku taago iyo
Mixnad aan dhammaaniniyo
Muran iyo been maldahan
Mastuur xaal laga dhigiyo
Murugo xaajo keenta iyo
Male la awaalo nacay
Middii kale waxaan lahaa

Musuq iyo maasuqiyo
Mardabo iyo tuugo iyo
Maalkoo layska boobo iyo
Meeshi qof kaleeto oo





La yidhi xoog baa mulkiyi
Ninkii muruqlaa u hadhi
Anigu mooro duugga nacay
Middii kale waxaan lahaa

Magac iyo muunadiyo
Murjin la waraaryo iyo
Maqaawiir baannu nihiyo
Mufti daadiyaan ahiyo
Meeqaan baan leeyihiyo
Waxaa i dhalay maalig iyo
Faan macno daranba nacay
Middii kale waxaan lahaa

Maluuggii horeeto iyo
Maxmilkii dhagaxa iyo
Iimaan mandaq gaaban iyo
Masalo macnaheeda iyo
Muggeeduba yar yihiyo
Maxlal iyo maddiiddo iyo
Maroorkii waan nacaye
Middii kale waxaan lahaa

Masuug iyo miijin iyo
Macruufkoo la diido iyo
Xaqoo laga maarsadiyo
Maatadoon la gargaariniyo
Miskiin lagu maadsadiyo
Madhaxsi kuu gaara iyo
Mitanka cadaawe nacay
Middii kale waxaan lahaa

Makal iyo masaarid iyo
Madax la wareemo iyo
Majal naf la gooyo iyo
Mawdkoo loo adeego iyo
Gacalkoo la maago iyo
Mayal waran taagan iyo



Colaadda muskaaga nacay
Middii kale waxaan lahaa

Macduur iyo macsida iyo
Dhawr min baan leeyihiyo
Marwada weynee horiyo
Minyaraan guursadayda iyo
Mid baa la dumaalaydiyo
Habeen meel dhaxa kaliyo
Maraaci dumar baaban nacay
Middii kale waxaan lahaa

Maag iyo kala maagashiyo
Midowgoo la diido iyo
Waxaad tahay madiidiniyo
Maqiiq reer hebela iyo
Maxaa aniga iigu jira
Annagaa moolkii fadhina
Anigu madarkaaba nacay
Middii kale waxaan lahaa

Magaan iyo madadariyo
Intaan maankood wax garan
Wadaad masalo gaabaniyo
Maduul aan maskax lahayn
Mayeedhaan aan la odhan
Muranna kaa badiya iyo
Malcuun iyo jaahil nacay
Middii kale waxaan lahaa

Mariiq iyo meere iyo
Madhan ama dameero joog
Majinkii naafaha ku jiray
Meecaadkii horeeto iyo
Midkii degmo cirir ahaa
Mareeg libcas iyo faruur
Falag maarihii waan nacay
Middii kale waxaan lahaa





Masiix iyo Eebbe magan
Injiilkaa mudan samiyo
Macbudkoo la aado iyo
Mahad badan oon naqniyo
Muxubbo weyn iyo kalgacal
In lagu maamuuso sharaf
Ciddii maya tidhina nacay
Middii kale waxaan lahaa

Murtad kuwa nagu yidhiye
Ma aha yidhi macatabkii
Midnimada Eebbe diidayee
Magaca Sayidkeenna iyo
Marinkii runta ee mudnaa
Iftiinkaa muuqana hayiyo
Diiday ma huraanka nacay
Middii kale waxaan lahaa

Misaal ama cid masayn
Muunada aadanuhu yihiyo
Malag aan la arkayniniyo
Wax muuqdoo idilba iyo
Wax nool ama mootamaba
Masiix meeqaankii la waa
Qofkii ka masayray nacay
Middii kale waxaan lahaa

Murti iyo milladba iyo
Hadal macno weynle iyo
Taariikh ma hadhaan ahiyo
Mucjiso lala yaabo iyo
Xigmat loo mohanahayiyo
Farriin meel dheer tagtiyo
Injiilkaa leh miyirkaa
Middii kale waxaan lahaa

Murugo maaro loo heliyo
Wixii aan mutaysanniyo



Mujrimkoo la cafiyiyo
Miryaadkii xanuunka iyo
Dembigoo la maydhay iyo
Mar kale oon dhalanay iyo
Masiixaa leh mahadin taa
Middii kale waxaan lahaa

Maqsuud iyo muuso iyo
Jacayl aan madhanin iyo
Cishqi aan lahayn marxalad
Mug weyn iyo deeqsiyoo
Intii soo mudata iyo
Naflaha aan kala madhayn
Masiixaa leh meel la tago
Middii kale waxaan lahaa

ADAA NAGA MASUULA

K. Axmed

Ciisoow Masiixow
Adaa naga masuuloo
Miyi iyo magaalaba
Nagu maamulaayee
Murugada innaga dhowr

Ciisow Masiixow
Madigii Ilaahow
Adigaa maanta iyo berri
Magacaaga qudduuska ah
Hawsha ku maamulaynaa

Muddaan maroornoo
Murugiyo ciil ku nooleyn





Mar haddaan maqsuud nahay
Sayid Ciise Masiixow
Adigaan ku mahadin

Ciisow Masiixow
Maareeyihi dunidoow
Mid kastaba ajiibow
Nafta maamulkiisow
Kaama maarmo adiga

Ciisoow Masiixow
Mugdigiiftiinshow
Adigan mar walba
Macbuudow ku leenahay
Kuu markhaati furaynaa

Muddaan maroornoo
Murugiyo ciil ku nooleyn
Mar haddaan maqsuud nahay
Sayid Ciise Masiixow
Adigaan ku mahadin



N



NABADDU WAA TII MASIIX

Y. B. Xirsi

Noloshu waa tii Masiix
Nimcada lagu wada farxiyo
Qalbiga Nuur buu ku shubay

Nuxuus iyo xaasidkii
Naxliga xumo uur ku jiray
Masiix baa nadiif ka dhigay

Wanaag aan naaqusayn
Intaad wada naawishaan
Nasriga soo raaca dee

Nasteexuu noo sidaa
Shaqada lagu wada najaxo
Injiilkay noloshu tahay

Nimcaaloo Sayid Masiix
Intuu noo rafaaday buu
Nolosha teennii u bixi

Nugayl wuu naga baxoo
Nagaadigan lagu gam'iyo
Nabaddu waa tii Masiix

Niyadda rajo lagu dhisiyo
Iftiinkiyo nalalkan shidan
Naxariisi waa tii Masiix

Nasteexuu noo sidaa
Shaqada lagu wada najaxo
Injiilkay noloshu tahay





WEHESHADA MASIIX

Y. B. Xirsi

Waynoow Ilaah
Waageeray duni
Wehelkeennu yahay

Warwarkiyo cabsidi
Waydaarannoo
Ruux baa nawada

War wanaagsanoo
Waaxidkeen ka yimid
Yaanu kuu wadnaa

Nimco waafiyoo
Waligeed jirto
Weel noogu shuban
Yaan wadaagaynaa

Waxyeelada sharkeyo
Wararkii iblays
Kasoo weecda oo
Weheshada Masiix

Walaal baaqayoo
Wax la eersadiyo
Waxyeeladi ka tagay





Waxuu doonayaa
Wanaag Eebbe tahay
Oon waabanayn

Waagii baryiyo
Wakhti dhexe habeen
Wardigiisa roga

Waxyeelada sharkiyo
Wararkii iblays
Kasoo weecda oo
Weheshada Masiix





H



RABBAASE II HIILLIYOO

Amin A. Axmed

Shaydaan hagardaamo wayn
Muxuu siday tahay hayin
Heddayda u dhaansan jiray
Muxuu hilinkii wacnaa iyo
Xaqaba iga horjoogsan jiray
Waxaan jirin igu hoggaanshay

Rabbaase ii hiilliyoo
Aniga i hanuuniyoo
Hogguu igu riday iblays
Hubaal iga soo baxshaye

Shaydaan hooggayga jecel
Muxuu himilooyin jirin
Naftayda ku hawli jiray
Intuu ii degay hiyiga
Muxuu laabataydii hoday
Ha hiigsan Masiix i yiri

Rabbaase ii hiilliyoo
Aniga i hanuuniyoo
Hogguu igu riday iblays
Hubaal iga soo baxshaye







MASIIXA WARKIISA YEEL

Aweis A. Ali

Soomaaliyey yaab ayaan
Ka yara qaadaa anigu
Xaqii oo yabaal ahaan
Inta yeershoon dhigaan
Haddana qaar yaacayaa

Ibliis yuu idin raranin
Yacyacood ha u malayn
Yagleel in uu naqaa
Yaanaad aakhiro lumine
Yake khayr ha u malayn

Adigoo yal heli karaa
Yamays maxaad ugu dhacdaa?
Belo yaryaraysi maleh
Xaqana lama yara yasee
Ciisaa wanaag kuu yasiri

Yawyab wax kuuma taro
Yaxaas ehel ha u malayn
Shaydaan yuusan ku yedin
Masiixa warkiisa yeel
Khayr baa kuu yeerayee

Booc xun oo meela yaal
Yooco lama sinaan karee
Shaydaan inta yur tiraa
Yumbo khayrkaa Masiix
Yididdiilo aad heshide



GUNAANAD

Waxaan rejaynayaa in aad si wanaagsan uga heshay uguna faa'iidaystay qasiiddooyinka buuggan ku urursan. Dadaal badan ayaa ku baxay curinta, ururinta, shaqal tirka iyo daabacaadda suugaantan oo qayb ka ah silsilladda *Maansada Masiixa* oo sanadkiiba soo baxda laba jeer.

Waxaan leeyahay Eebbe ajar haka siiyo walaalaha Soomaaliyeed ee ka tirsan xerta Sayid Ciise Masiix ee maanso diimeedkan ruuxiga ah qaybta libaax ka qaatay. Waa arrin aniga mar walba i farxad gelisa marka aan arko Masiixiyiin Soomaaliyeed oo curinaya qasiiddooyin iyo suugaan kale oo dadka Soomaaliyeed waxtar u leh.





Qasiiddooyinka waxaa horay u curin jiray dad kooban oo la wada garanayo balse dhawaanahan arrintaasi waa ay is bedeshay; Soomaali badan oo Masiixiyiin ah misna hibo Eebbe u leh suugaanta curinteeda ayaa isu xil qaamay in ay si joogto ah suugaan cusub Rabbiga ugu hibeeyaan. Waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa walaalahaas Soomaaliyeed.

Waxaan u arkaa guul weyn in buuggii labaad ee taxanaha *Maansada Masiixa* aad maanta gacanta ku hayso. Eebbe ayaan ka baryaynaa in uu innoo fududeeyo suugaan Masiixiyeedka kale ee aan soo saari donno. Haddii aad tahay Masiixi Soomaaliyeed oo hibo u leh curinta suugaanta Eebbe amaanka ah, waxaan kaa codsanayaa in aad qasiiddooyinkaas i soo gaarsiiso adiga oo ii soo marinaya amazingwisdom@gmail.com.

Aweis A. Ali




Also by Aweis A. Ali



ABOUT THE SERIES EDITOR

Rev. Aweis A. Ali (BTh., MDiv., PhD - candidate) is a missiologist and a poet. Aweis is a former house-church pastor, worship leader and evangelist; he has been in ministry since 1993. Aweis currently oversees the work of his denomination in the Horn of Africa.



Maandeeq Publishing

ISBN: 978-9914-701-86-9



9 789914 701869